


Sawirhadal, taxane wadahadal, sheekooyin bulsheed & maabab cawaaqibeed

Soo koobid (bog 1/2)



Sawirhadal waa eray guud oo kooba sawirid iyo hadalid wada socota.

Taxane wadahadal & *sheekooyin bulsheed* waa laba hab oo loo sawirhadlo

Taxane wadahadal & *sheekooyin bulsheed* waxay diirad saaraan in la caddeeyo xaalado bulsheed iyo sida dadka kale u fekeraan una gartaan.

Sheekooyin bulsheed waxay leeyihiin qaabdhismeed goonni ah oo la raaco




Ujeeddo

- *Sawirhadal*: in la caddeeyo wadahadalka

- *Taxane wadahadal*: in la caddeeyo wadahadalka adoo eegaya xaaladaha bulsheed

- *Sheekooyin bulsheed*: in la beddelo dabeecad adoo fahansan sababta iyo fahmida aragtida dadka kale iyo helidda xeelad kale

- *Jaantusyo cawaaqibeed*: in la beddelo dabeecad, in la helo xeelad kale



Tusaalayaasha xaaladaha

- u diyaargarowga waxa dhici doona

- sharraxidda isbeddel & dhacdooyin lama filaan ah

- fahmida sida qofku dareemayo ama u fekerayo

- baaridda wax dhacay (badanaa *sawirhadal* ama *taxane wadahadal*)

- "hadal keliya" (badanaa *sawirhadal* ama *taxane wadahadal*)




Wadahadal u diyaarin qof ama markaba u bilaabid

- *Sawirhadal*: badanaa markaba

- *Taxane wadahadal*: badanaa markaba

- *Sheekooyin bulsheed*: diyaari sheeko dammaystiran oo la tuso qofka loona akhriyo (*sawirhadal* ama *taxane wadahadal* ayaa loo adeegsan karaa caddayn ahaan)

- *Jaantusyo cawaaqibeed*: ama hadda ha la sameeyo ama ha loo diyaargaroo



Maxaan wax ku qornaa/sawirnaa?


- warqad & qalin

- abbka, tusaale. ritprata 2

- Barnaamij sawir, tusaale. bildstod.se (naqshadda "Bild och text" ayaa ku fiican *sheekooyin bulsheedka*)

Sawirhadal, taxane wadahadal, sheekooyin bulsheed & maabab cawaaqibeed


Soo koobid (bog 1/2)



Qoraal iyo/ama sawirro


- sawirro keliya
- sawirro & qoraal
- qoraal keliya

Taxane wadahadal waxa wax lagu sawiraa oo lagu qoraa afargees gudihii oo waxa la adeegsadaa sawir-xarriiqeedyo iyo astaamo sahlan.



Qaabdhismeedka sheeko bulsheed

1. Cinwaan wuxuu muujiniyaa waxa qofku ka helayo sheekada
2. Sharraxa xaaladda – qayb tilmaan ah
3. Macnaynta dareenka & falcelinta qofka & kuwa kale – qayb ra'yi ah
4. Dabci la jecel yahay, wax qofku samayn karo – qayb amar ah
5. Tilmaamo qofku wax ku xasuusto ama kaga reebmo



Kaydso ama tuur?

- *Sheekooyin bulsheed & jaantusyoo cawaaqibeed* kayso mar walba. Waxa lagu urursadaa buug/gal gudihiiis kaasoo qofku fiirsan karo ama akhrisan karo marmar badan xilliga uu qofku hawshan ku guda jiro. Xataa haddii dhibtii laga gudbey waa in la kaysado sababtoo ah dhibtii waa soo noqon kartaa

- *Staxane wadahadal & sawirhadal* looma baahna in la kaydsado waayo waxay naga saacidaan uun hadda wadahadal taagan laakiin haddaa rabto waa kaydsan kartaa



Faa' iidooyin

- Tartiibsi sugan – Tartiib ayaan u hadalaynaa markaan wax sawirayno
- Dhowr kannaal – arag waxa sawiran & maqal waxa la yiri
- Qayaxid – goor walba adeegso erayo isku mid ah adiga oo aan eegaynin qofka la jooga
- Dhexdhexaadsii – ma aha "edbin", sii tilmaamo intaad ul ku taagtaagi lahayd



Faa' iidooyin

- Kaydsanaan – qoraal/sawir waa haraa, hadalna waa tagaa
- Kordhid wacyi – qofku wuxuu arki sida dadku wax u samayn karaan wuxuuna fahmi sababta iyo inuu xulasho isaga ka timaada samayn karo
- Madaxbanaani – faham iyo tilmaan ayuu qofku wax badan keligiis ku qabsan karaa. Marka qofku awoodo oo uu wax badan qabsan karo ayaa waxa dhismaa xaalad faa' iido leh oo isa soo tarta.